

# Kaamirooyinka Talefishinka ee Isku Xiran

Seattle Police Department (Waaxda Booliska Seattle)

## Waa maxay Tignoolojiyda?

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle) nidaamka kaamirooyinka talefishinka (CCTV) si looga caawiyo yareynta iyo helista falalka danbiyada. Nidaamyada kaamirada ee CCTV ayaa la doonayaa in lagu rakibo aagag gaar ah oo rabshada hubaysan, tahriibinta dadka, iyo danbiyada jariimada joogtada ah ay ka dhacaan.

Kaamirooyinka ayaa loo jeedin doonaa dhanka wadada, geesaha wadada, iyo aagaga kale ee dadwaynaha boorar ayaana lagu dhajin doonaa si loo caddeeyo in kaamirooyin meesha ku xiran yihiin. Nidaamyada amaanka gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale muuqaallada tooska ah ee goobaha dadwaynaha la wadaagaaya SPD.



## Maxaan u isticmaaleynaa qalabka casriga ah?

Nidaamyada kaamirooyinka CCTV ayaa ka caawin doona baareyaasha uruurinta caddeynta la xiriirta danbiyada xunxun ee dagaalka, ayna ku jiraan kuwa dilka, weerarada iyo danbiyada kale ee jariimada ah. Nidaamka CCTV ayaa ka caawin kara baareyaasha aqoonsiga eedaysaneyaasha, fasixida dadka bilaa danbiga ah, iyo ka sifaynta hubka dilaaga ah wadooyinka, taasoo yareynaysa khatarta waxyeellada ku dhacaysa dadwaynaha.

Waqtiga ay furanyihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa [Seattle.gov/Surveillance](https://seattle.gov/surveillance).

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee farsamadaan waxaana loo gudbinayaa Dawlada Hoose.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Dawlada Hoose adoo adeegsanaaya iimeelka oo ah <https://seattle.gov/council>.

## Uruurinta

Xogta CCTV si ku meel gaar ah ayaa loogu xareeyaa nidaamka ugu badnaan 30 maalmood ilaa in ay ku jirto maahee cadeynta danbi markaas oo lagu hayn doono nidaamka kaydka caddeynta ee elektarooniga ah ee SPD. Policy 7.010 ([Xeerka SPD 7.010](#)) ayaa maamula gudbinta cadeynta una baahan in dhammaan cadeynta lasoo uruuriyay lagu diiwana gasho General Offense Report (Warbixinta Guud ee Danbiyada).

## Isticmaalka

Ujeedada barnaamijka tijaabada ah ee CCTV waa in la yareeyo hoos u dhacyada ciidanka ilaallada iyo baaritaannada ayadoo la adeegsanaayo tignoolojiyadaha leh caddeynta kuna habboon marxaladaha taagan si loo yareeyo loona baaro habdhaqanka danbiyada joogtada ah, rabshadaha hubaysan, tahriibinta dadka ee goobaha gaarka ah oo danbiyadu ka dhacaan. Aagga ay suurtagalka tahay in lagu sameeyo tijaabada ayaa ku yaala Aurora Avenue North, Belltown, Chinatown-International District, iyo Downtown Commercial Core.

## Difaacyada

Si loo yareeyo ciladaha xog uruurinta, kaamirooyinka CCTV ayaa la rakibi doonaa si ay u uruuriyaan dhacdooyinka ka dhacaaya meelaha dadwaynaha oo sharciyan aysan jirin waxyaabo sir ah oo qofku muujinaayo.

Muuqaallada CCTV duubaan ayaa si otomaatig ah loo tirayaa 30 maalmood kadib ilaa in muuqaalka loo duubay maahee cadeynta baaritaanka danbiga. Waxaa intaas dheer, nidaamyada kaamirada ee CCTV ayaa hayn doona diiwaanka xogta kaasoo uu eegi karo marka uu doono Office of the Inspector General for Public Safety (Xafiiska Hogaanka Guud ee Badqabka Dadwaynaha).